

**DEPARTEMENT
GESUNDHEIT UND SOZIALES**

Kantonaler Sozialdienst

Unterabteilung Asyl, Sektion Betreuung

17. Februar 2022

KORONA FAYRAS COVID-19 - MACLUUMAADKA HADDA JIRA

Dadka deegaanka ee qaaliga ah

Caabuqa korona fayras wuu sii yaraanayaa. Dadka intiisa badan waa la tallaalay ama waa ay ka soo bogsadeen caabuqa sidaas awgeedna way ka badbaadsan yihiin inuu ku dhaco cudur daran. Iyadoo la eegayo horumarkan wanaagsan, Golaha Federaalka wuxuu go'aansaday inuu meesha ka saaro/qaado in badan oo ka mid ah xadidaadyada dalka oo dhan ka jira ee ka dhanka ah cudurka safmareenka ah ee korona.

Ka saarida waajibaadka xirashada maaskarada

Waajibaadka ah in la xirto maaskaro marka la joogo hoyga, meelaha laga dukaameysto, maqaayadaha, dugsiyada, tas-hiilaadka dadweynaha iyo goobta shaqada waa la qaaday taas oo dhaqan galaysa isla hadda. Maaskarooyinka nadaafadda waxaa hadda xiranayaa oo keliya gaadiidka dadweynaha iyo goobaha daryeelka caafimaadka (xafiiska dhakhtarka, isbitaalka, iwm.).

Dadka deegaanka ah ee, sababo shaqsiyeed ama sababo caafimaad awgood, jeclaan lahaa inay sii wataan xirashada maaskarada inta ay joogaan gudaha hoyga ayaa dabcan sidaas samayn karaan. Weli waxaad daryeelahaaga ka heli kartaa maaskarooyinkas nadaafadda.

Qaadista xayiraadda saarnayd dadka soo booqanaya hoyga

Xayiraadda saarnayd booqashooyinka, taas oo loo soo rogay sababo la xiriira cudurka faafa ee Korona, ayaa la qaaday taas oo dhaqan galaysa isla hadda. Booqashooyinka lagu tagayo hoyada kale ee magangalyada ayaa mar kale la ogol yahay wixii ka bilowda 08:00 ilaa 22:00.

Wali ansax ah:

Isgo'doon haddii ay dhacdo in qofka baaritaan looga helo cudurka korona

Dadka baaritaan looga helay fayraska korona waa in ay isgo'doomiyaan ugu yaraan 5 maalmood. Haddii aad qabto astaamaha caadiga ah ee lagu garto cudurka, fadlan la socodsii xarunta daryeelka.

Tallaabooyinka la xiriira dhaqanka iyo nadaafadda

Tallaabooyinka la yaqaan ee la xiriira dhaqanka iyo nadaafadda (dhaqidda gacmaha, kala fogaanshaha, iwm) ayaa ah kuwo muhiim ah, maadaama fayraska Korona uu weli wareegayo isla markaana la kala qaadi karo.

Mahadnaq

Dadka deegaanka ah ee, sababo shaqsiyeed ama sababo caafimaad awgood, jeclaan lahaa inay sii wataan xirashada maaskarada inta ay joogaan gudaha hoyga ayaa dabcan sidaas samayn karaan. Laakin fayrasku ma uusan baabi'in. Dhammaanteen waxaa weli mas'uuliyad weyn oo naga saaran nafteena iyo dadka kale ee aan walaalaha nahay. Taasi waa sababta aan kaaga codsanayno inaad taxaddar muujiso, inaad sii waddo u hoggaansanaanta tallaabooyinka nadaafadda iyo inaad isla markiiba u sheegto qeybta daryeelka haddii aad la kulanto cabashooyin caafimaad. Aad ayaad u mahadsantahay!

Mahadsanidin

Qaybta Taageerada magangalyada

Stephan Müller
Maamulaha Qeybta

Marcel Thueler
Madaxa Qeybta Daryeelka